# XEERKA ILAALINTA NIDAAMKA EE DHISMAHA

Si an u ilaalino wanaagga iyo amniga dhismahan waxaa dhismahan ka jira xeerka ku dabaqan xeerka dowliga ah:

### Goobaha la wadaago iyo aagga dayrka

Albaabka bannaanka ee dhismaha qaybta jaranjarta wuu qufulnaanayaa 21.00-07.00 inta u dhaxeysa. Dhismayaasha leh koodhka albaabka taleefanka, albaabkoodu si joogto ah ayaay u xidhnaanayaan.

Goobaha la wadaago waa in loo dhex maraa si bilaa shanqadh ah. Si anan daruuri ahayn looma joogjoogi karo goobaha la wadaago.

In guriga lagu layriyo dhismaha qaybtiisa jaranjarta waa mamnuuc.

In sigaar lagu cabo qaybta jaranjarta ee dhismaha, wiishka iyo qaybaha kale ee la wadaago, balakoonada la wadaago, daaradaha dhismaha iyo aagga dayrka ama jagada dhismaha (oo ay ku jiraan meelaha dhismaha laga soo galo iyo qaybaha ay carruurtu ku ciyaaraan) iyo aagga jagada qaybteeda baarkinka ah. Sigaar in lagu cabo aagga deyrka ama jagada qaybahooda ay Heka si gaar ah u muujisay way bannaantahay, haddii meel noocaas ah loo diyaariyay. Dhismeyaasha sigaar la'aanta ah iyo 1.1.2021 laga bilaabo heshiisyada kirada ee la sameeyay in sigaar lagu cabo guriga dhexdiisa, balakoonka ama barandaha iyo aagga dayrka ee xaafadaha waa mamnuuc.

Sababo la xiriira amniga dabka awgood waa in alaabaha lagu keydsadaa oo kaliya goobaha loogu talo galay. Ashyaada khatarta ah ama si fudud uu dab uga dhalan karo in lagu keydsado goobaha la wadaago waa mamnuuc. Taayirada baabuurka (hal sad) ayaa lagu keydin karaa istoodhka hoose. Dhismaha qaybtiisa jaranjarta, daaradaha dhismaha iyo daaradaha istoodhada hoose laguma keydin karo waxba.

Ashyaada wax lagu midabeeyo laguma isticmaali karo qolalka dhardhaqista iyo saunada. Dhalooyinka iyo qalabka kale ee dhalada ka samaysan in la geeyo qolalka dhardhaqista iyo saunada waa mamnuuc. In roogag lagu dhaqdo qasaaladaha caadiga ah ee qolalka dhardhaqista waa mamnuuc.

Qashinka waa in la geeyaa goobaha loogu talo galay waana in la ilaaliyaa hagitaanka kala soociddooda loo dajiyay.

Dooga, dhirta la beeray, qalabka aagga deyrka loo isticmaalo, qalabka ay ku ciyaaraan carruurtu iyo waxyaabaha la midka ah dhaawac looma geysan karo.

Goobaha la wadaago iyo aagagga deyrka waa mamnuuc in qashin lagu daadiyo. In sigaarka laga tuuro balakoonka oo dhulka lagu daadiyo iyo qaybaha kale ee jagada waa mamnuuc.

Ciyaaraha kubaddu waa ka mamnuuc goobaha baarkinka ah iyo meelaha u dhow daaqadaha dhismaha.

In xerooyin lagu sameysto aagagga deyrka waa mamnuuc..

In xayaysiisyo ama tabeelooyin lagu dhajiyo waa mamnuuc. Anteenada sateliitka, anteenaha dadka barbaradka idaacadda u ah ama qalabka kale ee la midka ah waxaa lagu rakibi karaa oo kaliya balakoonka guriga qaybta gudaha ka soo xigta biraha balakoonka iyadoonan dhaawac loo geysan dhismaha.

### Jafidda boorka iyo qallajinta dharka qoyan

Roogagga iyo gogolaha waxaa la oggolyahay in meelaha loogu talo galay oo kaliya in boorka lagaga jafo. Hurgufidda go'yaasha iyo layrintooda iyo qalajinta dharka balakoonka qaybta gudaha xigta uun ayaa la oggolyahay in lagu sameeyo.

### Guryaha iyo balakoonada

Guryaha iyo dhismaha aaggiisa waa in dadka loogu dadaalaa inay ku helaan amniga degganaanshaha. Gaar ahaan saacadda 22.00-7.00 waa in la iska ilaaliyaa buuqa iyo waxqabadka kale ee rabshada leh.

Guryaha waa in si taxadar leh loo daryeelo. Waa in si joogto ah loo hubiyaa gambaleelka dabka tilmaamaya in uu shaqaynayo waana in haddii uu xunyahay ogaysiis laga bixiyaa.

Balakoonka waa in nadaafaddiisa la ilaaliyaa waana in barafka laga qaadaa wakhtiga jiilaalka. Balakoonka iyo aagga dayrka ee guryaha laguma ururin karo waxyaabaha kaydka u baahan ee culays ku keeni kara xaaladda dabdamiska ama dhibaato u keenaya bii'ada. In biyo dareeraya lagu dhaqo balakoonka waa mamnuuc. Weelka ubaxyada lagu beero iyo alaabta kale waan in gudaha laga dhigaa birta barandaha. Dalladaha qorraxda iyo qalabka u dhigma ee difaaca ah waa in si taxadar leh loo dhigaa.

Meel bannaan in dab lagu shito ama barandaha iyo aagga dayrka ee guryaha qiiq wax lagu bisleeyo waa mamnuuc. Balakoonka waxaa wax lagu duban karaa oo kaliya dabqaad koronto ka samaysan; aagga dayrka iyo balakoonada bannaanka xiga waxa lagu dubi karaa gaas iyo iyo koronto dabqaadyo loo isticmaali karo. Aagga dayrka in wax lagu dubto dabqaad ama qiiq wax lagu bisleeyo waxaay ku bannaantahay oo kaliya meelaha loogu talo galay. Ilaalinta badbaadada waxyaabaha uu dab ka dhalan karo waa in la ilaaliyo.

Biyo haddii ay guriga ku furmaan ama cillad kale ay ku timaado waa in sida ugu dhakhsaha badan loo ogaysiiyaa adeegga macaamiilka ee xafiiska nawaaxiga ama qofka heeganka ah. Musqulaha iyo bulaacadaha kale laguma shubi karo ama laguma sii dayn karo qashin awdi kara bullaacadaha.

Cayayaanka khasaaraha keena iyo xayawaanka lagu arko guryaha iyo aagga deyrta waa in sida ugu dhakhsaha badan la ogaysiiyaa adeegga macaamiilka ee xafiiska nawaaxiga ama qofka heeganka ah.

### Baarkinka

Baabuurka waxaa la dhigan karaa oo kaliya meelaha loo calaamadiyay. Booska baarkinka ee martida waxaa loogu talo galay oo kaliya dadka jagada soo booqday.

Goobaha baarkinka ah waxaa loogu talo galay gaadiidka waddooyinka lagu isticmaalo. Gaadiid la dayacay ama laga saaray isticmaalka waddada ama qaybo ka mid ah laguma kaydin karo nawaaxiga baarkinka ama meel kale oo jagada ama nawaaxigeeda ah. Gaadiidku waa in uu deeqaa goobta baarkinka ah ee cabirka gaadiidka marka dhinac kasta laga eego le'eeg, mana bannaana in gaadiidka la dhigayaa uu hakad galiyo inay dadka kale galaan gaadiidyadooda.

Haddii boos baarkin ah uu bannaanyahay, booskaas barkinka ah waxaa xattaa loo kiraysan karaa in lagu keydsado baaskiil.

Sanduuqyada kulaylinta baaburka waa in ay qufulnaadaan. Fiilada kulaylinta waa in laga saaraa korontada marka la isticmaalo kaddib. Sanduuqa kulaylinta baaburka looma isticmaali karo in lagu buuxiyo dabka baabuurta korontada ku shaqeeya ama kuwa iskujirka ah.

Xeerarka loo dajiyay in baaburku uu iska istaarnaado isaga oo anan la wadanin ee khuseeya nawaaxiyada baarkinada iyo aagga dayrka waa in la xaqdhowraa.

Baabuurta waxaa lagu daryeeli karaa oo lagu maydhi karaa oo kaliya meelaha loogu talogalay. Taayirada waa lagu baddalan karaa goobaha baarkinka.

### Xayawaanka la dhaqdo

Xayawaanka la dhaqdo waa in xariga ay ku xidhnaadaan marka lala marayo jaranjarta dabaqyada iyo nawaaxiga jagooyinka si dadka kale ay amni ugu maraan.

Waa mamnuuc in xayawaanka la dhaqdo la geeyo saunooyinka iyo qolalka qubeyska iyo dhardhaqista ah ee la wadaago.

Qofka bannaanka keensaday xayawaan uu dhaqdo waa in uu ka warhayaa inaanu xayawaankiisu wasakhaynin jagada iyo aagga dayrka ama dhirta la beero iyo darbiyada dhismaha. Saxarada xayawaanka waa in laga guraa dhulka. In xayawaanka la dhaqdo lagu wado goobaha ciyaarta ee carruurta iyo meelaha u dhow waa manuuc. Qofka xayawaanka dhaqanaya waa in uu ka warhayaa in xayawaanku dhawaaqiisa si joogto ah uunan ugu qashqashaadin nawaaxiga iyo dadka ku nool dhismaha.

Shimbiraha, dabegaalleyaasha iyo xayawaanka kale ee dhirta ku nool in lagu siiyo wax ay cunaan balakoonada iyo nawaaxiga jagada waa mamnuuc.

**Jabinta xeerarka ilaalinta nidaamka**

In la jabiyo xeer nidaamka lagu ilaalinayo waxaa ka iman kara in magdhow la bixiyo ama in heshiiska kirada la buriyo.

Qofka guriga deggan ayaa ka mas'uul ah inay martidiisu ilaaliyaan xeerarka ilaalinta nidaamka.